

Sidaan oo kale
ayaad cunugaaga
uga kaalmayn kartaa
casharada lasoo
siiyo



KULTUR OG
BORGERSERVICE
Aarhus Kommune

Talooyin fiican markii aad rabto, inaad cunugaaga ka kaalmayso casharada la soo siiyo

Wax aqrinta ka dhig mid joogtaa: weliba suurtagal inaad doorato goor ka mid ah maalinta, taasoo aad adiguba aad la fadhiisanayso ilmaha sida adigoo waydiiya:

- Ma itusi kartaa wixii maanta iskoolka laguugu soo dhigay?
- Ma jiraan wax casharro ah oo berri lagaa rabo? Ma isla fiirinaa jadwalkaaga?
- U isticmaal cunug kasta qiyaastii inta udhexaysa 10 ilaa 15 daqiiqo.

»Aniga xilka isaarani waa inaan cunuga siiyo deganaanshihi uu ubaahnaa, si uu ugu xasilo wixii uu ka shaqaynaayo.«
Waalidka

Cunugba cunuga Kale ha Kaalmeeyo

Ilmaha kuwa waawayn wax badan ayay kuwa yaryar utari karaan. Waxaad usoo jeedin kartaa inay raadsadaan saaxiib casharada ku adag ka kaalmeeya. Saaxiibkaas wuxuu noqon karaa qof ay fasalka isla dhigtaan ama walaaladiis.



»in casharada laga shaqeeyo waa muhiim, markaas waxaa noqonee cunug maadada yaqaan. Kadibna markaad waynaato waxaa noqonee nin wax yaqaan. Waxaan rabaa inaan noqdo bayloot.«

Wiil dhigta fasalka 2aad

Cunugaaga waxaa lasoo siin karaa casharo kala duwan. Caadiyan macalimiintu waxay casharro laga soo shaqeeyo dhiibaan marka:

- Marka la rabo in cunugu si fiican uga adkaado cashar macalinku iskoolku ugu dhigay.
- Marka la rabo in cunugu ku sii fiicnaado wax cusub, sida inla aqriyo tariiq, taasoo la rabo in mararka soo socda iskoolka looga shaqeeyo.
- Marka cunuga loo dhiibaayo howl gooniya, sida inuu curis soo qoro ama la rabo inuu fasalka hortiisa ka jeediyo mowduuc oow asagu doortay.

Ku hadlidda afsomaligu wuxuu ufududeenaayaa barashada afdaanishka


Ku hadlidda afsomaliga waa awood muhiim ah. Markasta oo cunugaagu ku fiican yahay afsomaliga, waxay ushaysaa ku hadlidda iyo aqrinta afdanishka. Sidaas darteed waa talo fiican in:

- Aad cunugaaga ugu sheegto afkaaga wax kasta eed la kulantiin. Ilmaha waxa badan looga sheekeeyo, marka dambe ayaguna waxay ku fiicnaadaan wax ka sheekaynta – xataa hadii afaf kale lagu sheegaayo.
- Sheeko xariir ama taariiqo ugu sheeg cunuga afkaaga hooyo, laakiin siyaabo kala duwan ayaa wax loogu aqrin karaa:
 - Waxaad waydiin kartaa wixii ay fahmeen
 - Waxaad ka jawaabi kartaa su'aalaha cunugu ku weeydiiyo
 - Waxaad ka wada hadli kartiin wixii aad masawirka ku aragtiin
 - Waxaa kaloo laga yaabaa inaad ka wada hadashiin waxa afdanish lagu yiraa waxyaabaha kala duwan

Qoysaska ilmahooda u aqriya buugaagta, ilmahoodu wuxuu ku fiicnaadaa afafka, waxaana ushlanaada barashada wax aqrinta.

**»Hadii aanan
cunugayga
gacan ka siin
casharada loo
soo diro, markaas
cunugaygu
wuxuu kaligiis
ku noqonaayaa
casharada.«**

Waalidka





Waxaad buugaag kala nooca ka daysan kartaa maktabadda, kuwaas ood cunugaaga u isticmaali karto:

- Buugaag ku qoran afsomali
 - Buugaag loo tarjumay afsomali
 - Sheeko xariir aad ku taqiin wadankaaga oo loo tarjumay afdanish
 - Qaamuus masawireed
- Maktabadaha intooda

Hadii cunugaagu iskoolka kala yimaado buugaag, lagana rabo inay soo aqriyaan, waxaad samayn kartaa:

- Udaa cunuga in isagu kuu aqriyo
- Waydii bal inay fahmeen waxa ay aqrinaayaan. iyo wixii ay ku saabsan yihiinba?
- Waxaad hadal afsomaliya ama danishah ka abuuri kartaa masawirada aad aragto. Maxay yihiin waxa masawirka kaaga muuqda?

Baaritaan la sameeyay wuxuu na tusaayaa:

»Markii uu cunugu gaaro 7ba jir, waalidkiis waxay saamayn ku leeyihiin inka badan 6jeer inta iskoolku awoodo sidii ay wax ku baran lahaayeen.«

Waxaa yiri Professor Charles Deforges Exter university, 2009



Intee kaleeto ood Kaalmo Ka raadsan Kartaa

Badan waxaa laga helaa cashar kaalmayn. Århus waxaa ku yaal maktabadahaan:

- Gellerup Bibliotek
- Hasle Bibliotek
- Hovedbiblioteket
- Risskov Bibliotek
- Tranbjerg Bibliotek
- Skødstrup Bibliotek
- Viby Bibliotek

bagga aad ka geli karto

Online-lektiehjælp på:

www.lektier-Online

Qoraalkaan waxaa isku soo duway oona wada-shaqayn dhaxmartay Viby Bibliotek, Århus Kommune og VIAUniversity College. Mashruucaana waxaa gacan siiyay Lektiecafepuljen, Styrelsen for Biblioteker og Medier samt fra Århus Kommunes pulje: *Rammen til mindre initiativer på integrationsområdet*

Guryaha shirkadaha qaarkood waxay isku duwaan cashar kaalmayn: waydii shirkada aad guryaha ka degan tahay.

Iskoolo badan, SFOyaasha iyo kuluubadaba waxay ayaguna isku duwaan cashar kaalmayn – arintaan ka warso cunugaaga iskoolkiisa.

Waad fiirsan kartaa fiidiyoowga:

Ku soo dhawoow iskoolada aasaasiga ah ee denmark.
www.uvm.dk/velkommen



Somalisk oversættelse af pjecen:
Sådan kan du hjælpe dit barn med lektierne



»Afangiriiskii yaraa een aqaanayna waa iga dhumay, erayo badan oo afdaanish ahna ma fahmayo, waa igu adag tahay inaan kaalmeeyo cunugayga... Cashar-kaalmaynta sanadkii hore lacagaan ku baxshay, sanadkaana meeshaanaan talaado iyo qamiis kasta imaada. Waxaan rabaa in cunugaygu wax barto.«

Waxaa yiri waalid imaada goobta cashar kaalmaynta

